



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Janaayo 14, 2022

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka  
Ujeedada: Ra'yi ururinta barnaamijka Adult in-Person

Waxaan ku faraxsanahay in aan idinla wadaagno in Oregon ay mar kale sameyn doonto ra'yi ururinta wax ku qanacsanaanta si loo ogaado sida wanaagsan ee aanu u buuxinayno dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo qoysaskooda. Ra'yi ururintani ayaa muhiim u ah fahamka waxa aan si fiican u qabanayno iyo halka aan u baahanahay inaan horumarino. Wareega koowaad ee ra'yi ururintu waxay bilaabmaysaa bishan.

Waxaanu markale iskaashi la yeelanaynaa mashruuca Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI). NCI waa dadaal wada shaqayneed oo ka dhexeeya Ururada Qaranka ee Agaasimayaasha Gobolka ee Adeegyada Naafanimada Koriinka iyo Machadka Cilmi-baarista Adeegyada Dadweynaha. Afartan iyo lix gobol iyo District of Columbia ayaa ka qayb qaata mashruuca. Jawaabahaagu waxay naga caawin doonaan aan la socono horumarkayaga muddo marka la joogo oo isbarbardhig ku sameyno barnaamijyadeena lala leeyahay gobolada kale.

NCI ayaa dejiyay muujiyayaasha xudunta u ah qaranka si loo fiiriyo natiijooyinka loogu talagalay dadka iyo qoysaska helaya adeegyada. Muujiyayaashu waxay muhiimada siiyaan, shaqada, xuquuqaha, qorsheynta adeega, ka mid noqoshada bulshada, kala doorashada iyo caafimaadka iyo badbaadada. Ra'yi ururinta waxaa sii socota in lagu daro su'aalo ku saabsan cudurka baahsan ee COVID-19 si loo qiimeeyo sida uu

cudurka baahsani u saameeyay nolosha dadka helaya adeegyada I/DD iyo hay'adaha bixinaya adeegyadaasi.

Oregon waxay ka qayb qaadanaysaa saddex ra'yi ururin 2022. Waxaanu kaa codsanaynaa in aad gacan ka geysato xaqiijinta guusha ra'yi ururinta adiga oo ka qayb qaadanaya marka la codsado.

Farriintani waxay ka hadashaa ra'yi ururinta u horreysa barnaamijka (adult in-person). Farriimaha mustaqbalku waxay ka hadli doonaan ra'yi ururinta ilmaha qoyska iyo xasiloonida shaqaalaha.

**Ra'yi ururinta barnaamijka adult in-person:** Kani sida caadiga waa kulan fool ka fool ah oo lala yeesho dad waaweyn oo si aan kala sooc lahayn loo soo xushay ee helaya adeegyada naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD). Iyada oo uu sabab u yahay cudurka baahsan, wareysiyada intooda badani waxay dhici doonaan iyada oo la adeegsanayo Zoom ama meel kale oo la kala dooranayo oo meel fog la joogo. Wareysiyo shakhi ahaaneed ayaa la bixin doona kaliya haddii si badbaado loo qaban karo oo la raaco tilmaamaha gobolka iyo degaanka.

Bishani, dad waaweyn oo si aan kala sooc lahayn loo soo xushay ayaa bilaabi doono helida warqado ku saabsan ka qayb qaadashada. Horraanta Febraayo, dad wax wareysanaya oo ka socda Oregon Health and Science University (OHSU) ayaa bilaabi doona wicitaanka dadka si loogu qorsheeyo kulamo. Dadku waxay dooran karaan in ay yeeshaan qof, sida mas'uulkooda, oo iyaga ka caawiya dhanka wareysiga. Oregon waa in ay qaadaa ugu yaraan 400 wareysi si gobolada kale loogu daro warbixinta qaranka.

Wareysiyada oo dhan waa in lagu soo dhammeystiraa muddo aan ka dambeyn Juun 2022. Macluumaadka la wadaago oo dhani waa mid qarsoodi ah. Natiijooyinku waa kuwo aan magac la socon.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NCI, fadlan booqo <http://www.nationalcoreindicators.org/>.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan ra'yi ururinta ka jirta Oregon, Julie Hoyt kala xiriiir [Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us](mailto:Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us) ama 503-891-7405.

Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta ka qayb qaadashadaada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.